

Ilaalinta amaanka iyo caafimaadka shaqada

Shaqaalaha

Sharciga Shaqaaleedka Ammaanka iyo Caafimaadka Minnesota (Minnesota Occupational Safety and Health Act) wuxuu shardi ka dhigayaa in aad shaqaalahaaga u diyaarisid goob shaqo oo ka badqabta halisyada la yaqaan oo sababi kara dhimasho, dhaawac ama jirro. Sidoo kale waa in aad raacdaa xuquuqda iyo masuuliyadaha goobta shaqada.

- Waa in aad raacdaa heerarka iyo nidaamyada badbadada idil shaqaalaha ee Minneota OSHA (MNOSHA).
- Loo shaqeeyahaaga waa in uu ku siiyo macluumaad kasta oo ku saabsan halisyada kiimikada, halisyada cawaamilka muuqata iyo cawaamilka caabuuqyada goobta shaqada ka dhalan kara.
- Xaq waxaad u leedahay in aad kala hadashid loo-shaqeeyahaaga ama MNOSHA walaacyada ku saabsan ammaanka iyo caafimadka goobta shaqada.
- Xaq waxaad u leedahay in aad diiddo qabashada shaqada haddii aad rumaysantahay in xilka ama qalabka uu kuu keeni karo halis deg-degga ama dhimasho ama dhaawac jirka. Si kastaba, waa in aad qabataa xil kasta oo loo-shqeeyahaagu kuu xilsaaro. Goobta shaqada si fudud ugama tagi kartid.
- Xaq waxaad u leedahay in lagu soo wargaliyo ama lagu faahfaahiyo haddii loo-shqeeyahaagu dalbado in wax laga baddelo heerarka shuruudaha MNOSHA.
- Xaq waxaad u leedahay in aad la hadashid baaraha MNOSHA ee goobtaada shaqada baaraya.
- Xaq waxaad u leedahay in aad ka xarayso cabasho MNOSHA ku saabsan ammaanka, caafimaadka halisyada iyo codsato in baaris la sameeyo. MNOSHA uma kashifayso magacaada loo-shaqeeyaha.
- Xaq waxaad u leedahay in lagu tuso xogta dacwdaha idil, ciqaabaha iyo khafiifinta canshuuraha MNOSHA ay ka samaysay loo-shaqeeyahaaga.
- Loo-shaqeeyahaagu kuguma takoori karo isticmaalka xuquuqdaada Sharciga awgeed. Si kastaba, loo shaqeeyahaaga waxuu kugu anshax-marin karaa sababa la xariira in aadan raacin nidaamyada ammaanka iyo caafimaadka. Haddii aad rumaysantahay in loo-shaqeeyahaagu ku takooray sababa la xariira isticmaalka xuquuqdaada Sharciga, waxaa aad haysataa 30 maalmood in aad uga soo dacwooto MNOSHA.
- Loo-shaqeeyahaagu waa in uu bixiyaa kashifaad kasta iyo xog kasta oo caafimaad ee adiga lagaa hayo marka la weydiisto.
- Xaq waxaad u leedahay in aad ka qaybgasho horumarinta heerarka MNOSHA.

Loo-shaqeeyeyaalka

Waa in ad u diyaarisaa shaqaalahaaga jawi ammana oo caafimaad qaba xorna ka ah halis la garan karo oo sababi karta dhimasho, dhaawac ama jirro iyo u hoggaansanaatid heerarka MNOSHA ee la dhabaqi karo oo idil. Waxaa kale leedahay xuquuqda iyo masuuliyadaha soo socda.

- Waa in aad ku dhajisaa nuqul ka mida sawirkan wayn iyo dokumentiyada kale ee MNOSHA meelaha lagu dhajiyo ogaysiisyada shaqaalaha.
- Waa in aad soo wargalisaa MNOSHA siddeed sacadood gudahood shilalka idil ee sababa dhimasho shaqalaha.
- Waa in aad soo wargalisaa MNOSHA 24 saac gudahood shilalka idil ee sababa addin go', indha-beel ama isbitaal seexin ee shaqaale kasta ku yimaada.
- Waa in aad u oggolaataa baarayaasha MNOSHA in ay sameeyaan baarisyada, waraysiyada shaqaalaha iyo dib-u-eegidda xogta.
- Waa in aad diyaarisaa qalabka idil ee ilaalinta shaqaalaha iyo tababarrada oo aad adigu kharashkooda qabto.
- Xaq waxaad u leedahay in aad ka qaybqaadato horumarinta heerarka MNOSHA.

Kaalmada ammaanka iyo caafimaadka lacag-la'aanta

Kaalma lacag-la'aana oo la sugayo iyo halisyada saxda ah ayaa shaqaalaha u diyaara, iyado aan dacwao lahayn iyo ciqaab toona, oo loo sii marayo MNOSHA Workplace Safety Consultation telefoonka (651) 284-5060, 1-800-657-3776 ama osha.consultation@state.mn.us.

La xariir MNOSHA wixii ku saabsan nuqul Sharciga, ee si gaara u quseeya ammaanka iyo caafimaadka heerarka xaraynta dacwo la xariirta halisyada goobta shaqada.

Loo-shaqeeyaha, shaqaalaha iyo xubnaha ka mida dadweynaha ee doonaya in ay dacwo xareeyaan la xariirta Barnaamijyada MNOSHA waxay u qori karaan waraaq federaalka OSHA Gobolka Xaafiiska 5: U.S. Department of Labor, Occupational Safety and Health Administration, Chicago Regional Office, 230 S. Dearborn Street, Room 3244, Chicago, IL 60604.



(651) 284-5050 • 1-877-470-6742 • osha.compliance@state.mn.us • www.dli.mn.gov

Sharciga ayaa qaba in lagu dhajiyo meel shaqaalaha si fudud u arki karan.

Agoosto 2017